EBT-ga Cudurka Safmarka ah

Sannad Dugsiyeedka 2020-21

Su'aalaha Inta Baddan La Isweydiiyo

Macluumaad Guud

1. Waa maxay barnaamijka EBT ee Cudurka Safmarka ah?

Barnaamijka EBT ee Cudurka Safmarka ah, ama P-EBT, ayaa wuxuu dheefaha cuntada siiyaa ardayda xaqa u leh si uu u beddelo kharashka raashiinka ay ardaydu heli lahaayeen haddii aysan jiri lahayn la'aanta wax-baridda qof ahaanta ah ama iyada oo sabab u ah xiritaannada iskuulka inta lagu guda jiro sannad dugsiyeedka 2020-21. Fadlan eeg su'aalaha 6aad – 11aad ee loogu talagalay macluumaadka xaq-u-yeelashada P-EBT.

2. Sidee ayuu kani uga duwan yahay sannad dugsiyeedkii ugu dambeeyay?

Barnaamijka P-EBT ee sannad dugsiyeedka 2019-20 ayaa asal ahaan wuxuu dheefaha cuntada siiyay carruurta xaqa u leh ee jirta da'da iskuulka ee loogu talagalay bilaha Maarso, Abriil, Maajo iyo Juun ee 2020. Qoysaska codsaday dheefahan iyo haddii la go'aamiyay in ay xaq u leeyihiin, waxay heleen qaddar dheef xaddidan oo mar qura la wada bixiyo iyada oo loo soo marsiinayo kaarka Quest EBT.

Gobolka Washington ayaa wuxuu dowladda federaalka ka helay oggolaansho uu carruurta ku siinayo dheefaha P-EBT oo ay sabab u ahaayeen xiritaannada iskuulka ee sannad dugsiyeedka 2020-21, laga soo bilaabo sibteembar 2020 ilaa Juun 2021. Waxaan otomaatik ka dhignay hannaanka xaq u yeelashada si qoysas badan ay u helaan kaalmada ay u baahan yihiin inta lagu guda jiro xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha ee COVID-19. Tani waxay ka dhigan tahay in qoysaska aan laga doonayn in ay codsadaan barnaamijka P-EBT ee 2020-21.

3. Cunugeyga wuxuu ku jiraa daryeelka carruurta. Miyaannu helaynaa dheefaha P-EBT?

Si dheefaha P-EBT loo siiyo carruurta ku jirta daryeelka carruurta laga soo bilaabo Oktoobar 2020 ilaa Sibtembar 2021, gobollada waa in ay diyaariyaan oo ay soo gudbiyaan qorshe P-EBT gaar ah oo loogu talagalay in ay oggolaato dowladda federaalka. Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada waxay hadda diyaarinaysaa qorshaha si ay u bixiso dheefaha carruurta ku jirta daryeelka carruurta.

Qoysasku waxay muddo ka-dibba mar eegi karaan www.dshs.wa.gov/PEBT si ay u helaan macluumaadkii ugu dambeeyay.

4. Haddii aan helo dheefaha P-EBT, miyay saameynaysaa xaaladeyda socdaalka ama iga dhigaysaa qof ay dowladda mas'uul ka tahay?

Maya. Xeerka Mas'uuliyadda Dowladda laguma dabaqi karo dheefaha P-EBT oo dheefaha P-EBT-na ma saameyn doonaan xaaladda socdaalka.

5. Cunugeyga wuxuu qado ka helaa iskuulka. Miyaan weli xaq u yeellan karaa P-EBT?

Haa Dheefaha P-EBT waa dheefo cunto oo dheeraad ah. Carruurtu waxay ka sii heli karaan cuntooyinka la qaato oo lala baxo (grab-and-go) iskuulka ama goobaha bulshada, ama cuntada xaaladda degdegga ah oo laga helo goobaha quudinta xaaladda degdegga ah ee COVID-19 ee lagu bixiyo goobaha bulshada, xitaa haddii ay qaadanayaan dheefaha P-EBT.

Hay'adan waxaa ay bixisaa fursad loo siman yahay.

Washington State Department of Social & Health Services

Transforming lives

Xaq-u-yeelashada P-EBT

6. Kumaa xaq u leh P-EBT?

Carruurta sida caadiga ah u hesha Barnaamijka Qadada Iskuulka ee Qaranka, ama NSLP, iyo Barnaamijka Quraacda Iskuulka, ama SBP, kana diiwaangashan/ ku qoran iskuul ku yaalla gobolka Washington kaas oo:

- La xiray ama yareeyay imaanshaha muddo shan maalmood ama ka badan oo isku xigxiga iyada oo sabab u ah xaaladda degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha ee cudurka COVID-19 intii lagu guda jiray sannad dugsiyeedkii 2020-2021, iyo
- Go'aamiyay in cunugga uu xaq u leeyahay cuntooyinka iskuulka oo bilaash ah ama qiimahooda la yareeyay.

7. Haddii carruurteydu ay dhigtaan iskuullada Xaq-u-yeelashada Bulshada ama Bixinta 2 kuwaas oo lagu bixiyo quraac iyo qado bilaash ah, miyay xaq u leeyihiin P-EBT?

Dhammaan carruurta dhiganaysa iskuulka Xaq-u-yeelashada Bulshada ama Bixinta 2aad waxay xaq-u-yeelan karaan P-EBT haddii barashada qof ahaanta ee iskuulka uu cunugga dhigto hoos loo dhigay iyada oo sabab u ah cudurka COVID-19.

8. Waxaan horey u qaadan jiray gargaar cunto. Miyaan si otomaatik ah ugu qalmaa P-EBT?

Inta badan carruurta qaadata gargaarka cuntada waxaa si otomaatik ah loogu aqoonsadaa cuntooyinka iskuulka ee bilaashka ah, balse si otomaatik ah uguma qalmaan dheefaha P-EBT. Xaq-u-yeelashada P-EBT waxay ku tiirsanaan doontaa iskuulka uu cunugga dhigto iyo qaabka waxbarashadooda. Eeg su'aasha 22aad si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

9. Qoyskeyga wuxuu qaataa $0 oo gargaar cunto ah. Miyaan si otomaatik ah ugu qalmaa P-EBT?

Qoysaska qaarkood waxay helaan $0 oo qaddarka dheefta cuntada ah waxayna kiiskooda ka dhigaan mid furan si ay u helaan kheyraadyo kale. Qoysaska hela $0 oo gargaar cunto ah si otomaatik ah looguma aqoonsado raashiinka iskuulka ee bilaashka ah oo waa in ay u codsadaan raashiin qiimo jaban ama bilaash ah iyaga oo la xiriiraya iskuulka cunugooda.

10. Carruurteyda guriga ayaa wax lagu baraa. Miyay u qalmaan P-EBT?

Maya. P-EBT ayaa waxaa heli kara oo keliya carruurta dhigata ama adeegyada waxbarasho ku qaadanaysa iskuulka, waxayna caadi ahaan qaataan cuntooyinka iskuulka oo qiimo-jab ama bilaash ah iyada oo loo marayo NSLP ama SBP haddii iskuulku aanan la xirin ama uusan dhimin imaanshaha.

11. Sideen ku oggaan karaa haddii cunugeyga uu xaq u leeyahay dheefaha P-EBT?

Carruurta xaqa u leh waxay heli doonnaan ogeysiis iyo kaarka P-EBT oo magacooda ku qoran. Waxaan filaynaa ogeysiiska in loo diro carruurta xaqa u leh bilow dabayaaqada bisha Maarso. Kaarka P-EBT ayaa boostada lagu soo diri doonnaa waxyar ka-dib. Qoysasku waa in ay haystaan kaararkooda maadaama dheefo dheeraad ah laga yaabo in goor dambe lagu soo daro haddii iskuulkooda sii xirnaado ama saacadahiisa la yareeyo.

12. Maxay tahay sababta ay muddo dheer u qaadato in la helo kaarka P-EBT?

Waaxda Beeraha ee Mareykanka ayaa ku talisay in gobollada ay kala du-duwaan waqtiga bixinta si looga fogaado dhibaatooyinka arrimaha sayladaha suuqa ee dukaamada raashiinka iibiya ee maxaliga ah.

Helidda dheefaha P-EBT

13. Sideen ku heli karaa dheefaha P-EBT ee sannad dugsiyeedka 2020-21?

Qoysaska xaqa u leh uma baahna in ay codsadaan si ay u helaan dheefaha P-EBT ee sannad dugsiyeedkan. Cunug kasta oo xaq u leh ayaa wuxuu heli doonnaa kaarka P-EBT oo si toos ah boostada loogu soo dirayo qoysaska iyada oo aanan barta internet-ka laga codsan. U noqo su'aasha 6aad si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qoysaska xaqa u leh.

14. Waa maxay cinwaanka lagu diri doonna kaarka P-EBT ee cusub?

Kaararka P-EBT waxaa lagu diri doonnaa cinwaanka ku qoran galka ama faylka iskuulka. Iskuulkaaga la xiriir si aad u xaqiijiso in ay hayaan cinwaankaaga boostada ee hadda.

Qoysaska soo gudbinaya codsiyada cuntada iskuulka oo ku qoran cinwaanka hadda waa in ay sidoo kale cusboonaysiiyaan cinwaanka uu iskuulku hayo. Nidaamyada cuntada iskuulka iyo nidaamyada macluumaadka ardayga waxaa laga yaabaa in aysan isku mid ahayn.

Helidda dheefaha P-EBT (la sii waday)

15. Taariikhda dheefaheyga miyaa dib la iigu celin karaa bilowga sannad dugsiyeedka?

Haa Haddii cunug la go'aamiyo in uu xaq u leeyahay, waxaannu bixin doonnaa dheefaha P-EBT oo dib loogu celiyay bilowga sannad dugsiyeedka 2020-21 ama bisha iskuulku noqday mid xaq u leh iyada oo loo marayo Jannaayo 2021. Dheefaha bilahan waxaa la bixin doonnaa bisha Maarso 2021; haseyeeshee, qoysaska waxaa laga yaabaa in aysan helin kaarkooda ilaa iyo dhammaadka bisha Abriil. Qaddarada cunug kasta way kala duwanaan karaan iyada oo lagu saleynayo qaababka waxbarashada iskuulladooda. Dheefaha bisha Febraayo ilaa dhammaadka sannad dugsiyeedka waxaa loo bixin doonnaa bil dhaaf.

16. Maxaan u baahanahay in aan sameeyo marka kaarka P-EBT ee cusub uu soo gaaro boostada?

Raac tilmaamaha la yimaada kaarkaaga P-EBT waxaadna abuurtaa Lambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiyeed ee Amaanka ah ama PIN. Kaarkaaga hayso! Haddii iskuulkaagu uu ku sii shaqeeyo deegaan waxbarasho meel kale laga bixiyo, leeyahay maalmaha imaanshaha oo la dhimay ama loo xiray sababo la xiriira COVID-19, waxaan dheefo dheeri ah ku dari karnaa kaarkaaga.

17. Miyaan haystaa kaarkeyga P-EBT?

Haa Dheefo dheeraad ah ayaa la bixin karaa goor dambe oo sanandka ah. Kaararka waa in la dhigaa meel amaan ah.

18. Ka waran haddii aan u baahanahay kaarka P-EBT oo beddel ah iyada oo sabab u ah in uu iga lumay ama ay waxyeello gaartay?

Beddelaadda kaarka P-EBT ayaa laga shaqeeyaa iyada oo laga wacayo iibiyaha EBT, FIS, lambarkan 888-328-9271. Qoysaska ayaa sidoo kale booqan kara www.ebtEdge.com ama app-ka ebtEdge haddii kaar beddel ah loo baahan yahay. Si aad u codsato kaarka P-EBT ee beddelka ah, waxaad u baahan doontaa macluumaadkan soo socda: magaca buuxa ee cunugga, taariikhda dhalashada, sumadda degaanka iyo cinwaanka oo dhan oo ah sida uu iskuulku bixiyay.

Cinwaanka boostada waa in uu waafaqsan yahay midka ku jira sistem-ka ee loogu talagalay in kaarka beddelka ah lagu soo diro. Fadlan filo toddobo ilaa 10 maalmood oo kuwa shaqada ah in aad ku hesho kaarkaaga.

Ka eeg su'aasha 20aad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan goorta cinwaankaagu uusan waafaqsanayn midka ku jira faylka, iibiyaha EBT, FIS.

19. Miyaan dheefahan gelin karaa kaarkeyga EBT ee cuntada ee jira?

Maya. Barnaamijka P-EBT waa mid gaar ah dheefuhuna waxay ka duwan yihiin dheefaha kale ee kaashka ama cuntada ee laga heli karo kaarkaaga Quest EBT.

20. Cunugeygu ma helin ogeysiiska ama kaarka P-EBT. Maxaan sameeyaa?

Haddii aadan kaarkaagu helin marka ay taariikhdu tahay Maajo 2021, ka wac Xarunta Xiriirka ee P-EBT lambarkan 833-518-0282.

21. Dheefahan uma baahnin. Miyaan diidi karaa?

Waxaan ku dhiirrigelinaynaa qoysaska la go'aamiyay in ay xaq u leeyihiin P-EBT in ay u adeegsadaan dheefaha qoyska iyo in ay gacan ka geystan kobcinta dhaqaalaha degaanka. Dheefaha cid kale looma wareejin karo lamana hadiyeyn karo ama dad laguma deeqi karo. Haddii aad weli doonayso in aad diido dheefaha, waxaad baabbi'in kartaa kaarka ama kaarka ku celi cinwaanka ku xusan xagga dambe ee kaarka. Dheefaha ayaa si otomaatik ah loo bixin doonnaa ka-dib 274 maalmood oo aanan la adeegsan.

Qaddarada Dheefta P-EBT

22. Immisa ayaan ku helo doonnaa dheefaha P-EBT?

Raashiinka ayaa miisaaniyadiisa lagu miisaamaa qiime maalinle ah oo dhan $6.82, kaas oo daboolaya qado, quraac iyo cuntada fudud, oo lagu dhuftay celcelis ahaan 18 maalmood oo la hawlgalayo bil kasta ee sannad dugsiyeedka 2020-21.

Qaddarka dheefta P-EBT ayaa lagu saleeyaa xaaladda waxbarashada arday kasta waxayna ku kala duwan tahay min arday ilaa arday, xitaa gudaha qoyska.

Iskuullada waxay ka soo warbixin doonnaan habka waxbarashadooda ee ardayda intooda badan ee bisha inteeda badan. Iskuul kasta waa gaar waxaanna laga yaabaa in ay wax-ka-beddeleen qaabka waxbarashadooda dhowr jeer tan iyo Sibtermbar 2020. Iyada oo tani sabab u ah, cunug kasta wuxuu qaadan karaa qaddar dheef oo ka duwan. Shaxda hoose ayaa bixinaysa heerarka dheefta ee kala duwan oo ku saleysan qaabka waxbarashada.

Qaabka Waxbarashada	Xisaabinta	Qaddarka Doolar Ahaan Bil kasta
Waxbarasho buuxda oo meel kale laga bixiyo	$6.82 x 18 x 100%	$123
Hal maalin qof ahaan ah	$6.82 x 18 x 80%	$99
Laba maalmood oo qof ahaan ah	$6.82 x 18 x 60%	$74
Saddex maalmood oo qof ahaan ah	$6.82 x 18 x 40%	$50
Afar maalmood oo qof ahaan ah	$6.82 x 18 x 20%	$25

23. Maxay tahay sababta qaddarka aan loogu saleyn imaanshaha dhabta ah ee cunugeyga?

Si aynu u caawino carruurta ugu badan, waxaannu adeegsanay qaddarka caadiga ah ee gobolka oo dhan ee lagu abaalmariyay carruurta. Ma aanan awoodin in aynu la soconno imaanshaha ardayga gaarka ah. Waxaannu adeegsanaynaa qaabka waxbarashada ugu muhiimsan ee iskuulka carruurta sida uu sheegay iskuulka.

24. Miyaa la beddeli karaa ama la sixi karaa qaddarada P-EBT?

Qaddarka P-EBT ayaa lagu saleyn doonnaa waxa uu iskuulku sheegay in ay tahay qaabka waxbarashada ugu muhiimsan ee iskuulka oo dhan ee bil kasta. Haddii aad aaminsan tahay in uu qalad ka jiray qaddarka P-EBT ee cunugaaga, waxaad ka waci kartaa Xarunta Xiriirta P-EBT lambarkan 833-518-0282 si aad u codsato in ay dib-u-eegaan xaq-u-yeelashadaada.

25. Ma jiri doonnaan dheefaha P-EBT oo dheeraad ah?

Dheefaha loogu talagalay bisha Febraayo ilaa dhammaada sannad dugsiyeedka waxaa loo bixin karaa bil dhaaf haddii iskuulkaagu uu sii-wado in uu leeyahay waxbarasho qof ahaan ah oo xaddidan. Dheefaha EBT ee Cudurka Safmarka ah ee sannad dugsiyeedka mustaqbalka waa kuwo aan la garanayn. Hubso in aad kaarkaaga u haysato dheefaha mustaqbalka ee suuragalka ah. Fadlan booqo www.dshs.wa.gov/pebt si aad u hesho faahfaahinno dheeraad ah.

Xarunta Xiriirka P-EBT

26. Kumaan wacaa haddii aan qabo Su'aalaha P-EBT?

Dhammaan su'aalaha xaq-u-yeelashada P-EBT waxaa loogu hagaajin karaa Xarunta Xiriirka P-EBT lambarkan 833-518-0282.

27. Kumaan wacaa haddii aan rabo in la ii sameeyo PIN-keyga?

Marka aad kaarkaaga hesho, qoysasku waxay waci karaan 888-328-9271 si loo sameeyo PIN-kaaga.

28. Kumaan la xiriiraa haddii aanan helin kaarkeyga P-EBT iyada oo sabab u ah beddel cinwaan?

Qoysasku waa in ay Xarunta Xiriirka P-EBT ka wacaan 833-518-0282 si ay u helaan caawimaadda beddelka cinwaanka.

Adeegsiga dheefaha P-EBT

29. Halkeen ku adeegsan karaa dheefaheyga P-EBT maxaanna ku iibsan karaa?

Kaarkaaga P-EBT u adeegso sida kaarka amaahda. Dheefahaaga P-EBT ayaa cunto looga iibsan karaa inta badan dukaamada raashiinka iyo suuqyada beeralayda. Waxaad ku adeegsan kartaa dheefahaaga P-EBT dukaan kastoo aqbla EBT, oo ay ku jiraan kuwa barta internet-ka ee Amazon iyo Walmart. Tafaariiqleyda intooda badani waxay leeyihiin calaamado sheegaya in ay aqbalaan EBT.

Dheefaha P-EBT ayaa loo adeegsan karaa in lagu iibsado cunto kasta ee lagu iibsan karo SNAP EBT. Cuntooyinka u-qalma EBT waa cuntooyinka intooda badan, marka laga reebo kuwa diyaarsan iyo cuntooyinka la iibiyo iyaga oo kulul. Waxaad oggaan kartaa wax badan oo ku saabsan cuntooyinka u-qalma EBT adiga oo booqanaya Maxaa SNAP lagu Iibsan karaa?

30. P-EBT ma loo adeegsan karaa kuwa u dhigma Suuqa SNAP (SNAP Market Match)?

Haa Qoysaska adeegsan kara P-EBT-gooda si ay u helaan kuwa u dhigma Suuqa SNAP (SNAP Market Match). Barnaamijkan wuxuu qoysaska u oggolaanayaa in ay ku helaan labajibbaar qaddarka cuntada ka-qaybgalka suuqyada beeralayda! Wax badan ka oggow DOH SNAP Market Match.

31. Ma tahay in aan adeegsado dhammaan dheefaheyga P-EBT marka aan helo?

Maya. Dheefaha waxay u wareegayaan min bil ilaa bil. Dheefahaaga P-EBT ayaa waxay ku jiri doonnaan kaarkaaga ugu badnaan 274 maalmood min hawlgalkaaga ugu dambeeya laga soo bilaabo taariikhda bixinta.

Ha iska tuurin kaarkaaga P-EBT. Inta ay jirto xaaladda degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha ee COVID-19, waxaan kaarkan ku bixin karnaa dheefaha P-EBT oo dheeraad ah.

32. Ma tahay in aan ku sameeyo PIN-keyga kaarkeyga P-EBT taariikh gaar ah?

Maya. Haseyeeshee, waxaan qoysaska oo dhan ku dhiirrigelinayaa in ay sameystan PIN-kooda oo ayna u hawlgeliyaan dheefahooda P-EBT sida ugu dhakhsiyaha badan oo ay u helaan kaarka, balse ma jirto taariikh kama dambeys ah oo loo qabtey in la sameeyo PIN-ka ama la-hawlgeliyo kaarka P-EBT.

33. Sideen ku eegaa baaqigayga?

Waxaad ka waci kartaa iibiyaha EBT, FIS, 888-328-9271 (lambarka ku qoran xagga dambe ee kaarka P-EBT) si aad u eegto baaqiga, ama booqo www.ebtEdge.com ama ku soo-deji barnaamijka ebtEdge telefoonkaaga gacanta.

34. Qof ayaa iga isticmaaley dheefaheyga. Miyaa la ii soo celin karaa?

Maya. Ma soo celin karno qiimaha dheef kasta ee la isticmaalay. Aad iyo aad ayay muhiim u tahay in aad doorato PIN amaan ah oo fudud in la xusuusto balse aan caadi ahaan loo adeegsan.

Waxaan kugu dhiirrigelinaynaa in aad kala xiriirto iibiyaha EBT, FIS, 888-328-9271 si aad u nasakhdo kaarkaaga oo aadna u codsato mid cusub. Haddii aad tuhunto khiyaanno, ka wac Khadka Tooska ah ee Khiyaannada Daryeelka Bulshada ee Gobolka Washington 800-562-6906.

Macluumaadka Kale ee P-EBT

35. Waxaan wajahayaa guri la'aan. Sideen ku heli karaa kaarkeyga P-EBT?

Haddii uu qoyskaagu wajahayo guri la'aan oo cunugaagana u-qalmo P-EBT, waxaad codsan kartaa kaarkaaga P-EBT in loo soo diro cinwaan kale oo aad ka heli karto (sida, iskuulka cunugaaga). Wac iskuulkaaga si aad u sameyso qabanqaabooyinka loo baahan yahay ee loogu talagalay qaadashada kaarka P-EBT.

36. Dheefaha P-EBT ma daboolayaan dhammaan kharashaadkeyga; waxaan u baahanahay gargaar badan. Yaan la xiriiraa?

Haddii aad u baahan tahay gargaar cunto ama gargaar lacag caddaan ah oo dheeraad ah, waxaad ka waci kartaa Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada si aad u codsato dheefaha 877-501-2233 ama booqo www.washingtonconnection.org.

Waxaad sidoo kale ka waci kartaa Shabakada Macluumaadka Washington, ama WIN211, lambarkan 877-211-9274 si aad wax badan uga oggaato kheyraadyada kale ee laga heli karo bulshadaada.

37. Ma jiraan dheefo cunto kale oo hadda la heli karo?

- Qalabkan cunto helidda ayaa qoysaska ku caawin kara in ay oggaadaan goobaha cuntada siiya carruurta. Ka-qaybgalka adeegyadan raashiinka ama cuntada kama hor istaagayaan carruurta xaqa u leh in ay helaan dheefaha P-EBT. La xiriir degmada iskuulka degaankaaga si aad wax badan uga oggaato goobaha ay ku yaallaan meelaha cuntada bilaashka ah lagu bixiyo ee degaankaaga. Barnaamijyadan raashiinka ayaa waxaa heli kara dhammaan carruurta ay da'doodu tahay 18 ama ka yar, iyada oo aan la tixgelinayn iskuulka ay dhigtaan.
- Waxaad booqan kartaa www.washingtonconnection.org si aad u codsato dheefaha Cuntada Aasaasiga ah.
- Haddii aad haysato carruur yaryar, waxaad sidoo kale xaq u yeelan kartaa barnaamijka Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta ama WIC, kaas oo gargaar cunto siiya carruurta jirta ilaa iyo da'da 5 iyo haweenka uurka leh iyo hooyooyinka naas-nuujiya. Macluumaad dheeraad ah ka hel https://www.doh.wa.gov/YouandYourFamily/WIC. Haddii aad tuhunto khiyaanno, ka wac Khadka Tooska ah ee Khiyaannada Daryeelka Bulshada ee Gobolka Washington 800-562-6906.